# هذا هو الإسلام

# Kan waa Islaamka

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

**(وَمَنْ أَحْسَنُ دِينًا مِمَّنْ أَسْلَمَ وَجْهَهُ لِلَّهِ وَهُوَ مُحْسِنٌ وَاتَّبَعَ مِلَّةَ إِبْرَاهِيمَ حَنِيفًا وَاتَّخَذَ اللَّهُ إِبْرَاهِيمَ خَلِيلًا)**

(**Yaa ka diin fiican ruux u jeediyay wajigiisa Alle isagoo samafali oo raaca diinta (Nabi) Ibraahim, wuxuuna ka yeeshay Alle Ibraahiim khaliil**).

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

**Intaas kaddib:**

Islaamka dhabta ah waa isdhiibid iyo daaco iyo in Alle loo hogaansamo iyo jacayl iyo raacid iyo ku dayashada nabigeena iyo dabeecad wanaagsan iyo khushuuc iyo wejifurfurnaan marka dadka oo dhan lala dhaqmayo iyo dhimrin iyo naxariis iyo qurux koonka oo dhan lala wadaago iyo dhisme iyo xadaarad iyo camirid, islaamka waa manhaj nololeed oo ay ku noolaanayaan dadka

raacsan dhaqdhaqaaqooda iyo deganantoodaba iyo dhammaan falalkooda.

Islaamka waa diin ugu yeeraysa wanaag iyo wanaajin iyo in lagu camiro adduunka diinta, ee inaan lagu duminin magaca diinta, waa diin ugu yeeraysa naxariis iyo amaan iyo nabad uu helayo caalamka oo dhan wuxuu leeyahay Alle:

**{وَمَا أَرْسَلْنَاكَ إِلا رَحْمَةً لِّلْعَالَمِينَ}**

(**Kumana aanaan dirin naxariista caalamka adoo ah mooyee**) Qofka fiirfiiriya tiirarka islaamka oo kusoo arooray xadiiska Jibriil markuu weyddiiyay nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - asoo dhahaya: Muxamadow iiga waran islaamka wuxuu yiri rasuulka: (**islaamka waa inaad qirto in Alle kale jirin Alle mooyee Muxamedna inuu yahay rasuulka Alle inaad oogto salaadda iyo inaad bixiso sakada inaad soonto Ramadaan iyo inaad u xajiso beydka haddaad awooddo...**) Wuxuu ogaanayaa inay tiirarka islaamka ay kaalin ka qaadanayaan dhisidda shakhsiyad toosan, markuu aadanaha aaminsan yahay in Alle uu yahay hal oo aan lahayn qof wax la wadaago sayidkeena Muxamedna uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa wuxuu ku dadaalayaa siduu u xaqiijin lahaa shaadadan asoo ay ka tahay daaco iyo taqwada Allaha caalamka rabbiga u ah, wuxuu qaadanayaa amarkiisa wuxuuna ka fogaanayaa wuxuu reebay, wuxuuna ag joogsanayaa

xuduudiisa kamana gaabiyo wixii la faray mana raadinayo wuxuusan xaq u lahayn, sidoo kale wuxuu ku dadaalayaa inuu si fiican u raaco nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - dadkana uu kula dhaqmo wixii nabiga kula dhaqmi jiray ee ah naxariis iyo dhimrin iyo tawaaduc iyo dabacsanaan.

Salaadda oo ah tiirarka islaamka midda ugu weyn faa'idadeeda waxay usoo laabanaysaa addoonka, iyadoo ka reebayso xumaanta iyo munkarka, waxay ku toosinaysaa waddada Alle, muslinka wuxuu kula noolaanayaa naftiisa iyo bulshada dhan nabad iyo amaan wuxuu leeyahay Alle:

**{اتْلُ مَا أُوحِيَ إِلَيْكَ مِنَ الْكِتَابِ وَأَقِمِ الصَّلَاةَ إِنَّ الصَّلَاةَ تَنْهَى عَنِ الْفَحْشَاءِ وَالْمُنكَرِ وَلَذِكْرُ اللَّهِ أَكْبَرُ وَاللَّهُ يَعْلَمُ مَا تَصْنَعُونَ}**

(**Akhri waxa luguu waxyoon oo kitaabka ah oog salaaddana maxaayeelay salaaddu waxay reebta xumaanta iyo waxa la noco, xusidda Allaana weyn, Allana waa ogyahay waxaad sanceyneysaan**).

Gudashada sakada waxaa ku sugan dhinacyada iimaanka iyo insaaniyada wax badan, nafta waxay ka reebaysaa inay ku xiranto nolosha adduunka ilaa uu ka ogaado qofka inuu maalka yahay arrin wax lagu gaaro ee uusan ahayn hadaf, sidoo kale waa albaabka isu gargaaridda iyo isu naxariisashada iyo in la dareemo dadka kale bulshada islaamka ma garanayso nafjeclaysi

iyo xumaan diinteena waa diinta siismada iyo wax huridda iyo furashada iyo u dooridda, mana aha naf la doorashada iyo bakhaylnimada iyo masuugga, qofka msulinka waa qof dabacsan oo deeqsi ah, wuxuu yiri Alle markuu amaanayay Ansaar :

**{وَالَّذِينَ تَبَوَّءُوا الدَّارَ وَالْإِيمَانَ مِنْ قَبْلِهِمْ يُحِبُّونَ مَنْ هَاجَرَ إِلَيْهِمْ وَلَا يَجِدُونَ فِي صُدُورِهِمْ حَاجَةً مِمَّا أُوتُوا وَيُؤْثِرُونَ عَلَى أَنْفُسِهِمْ وَلَوْ كَانَ بِهِمْ خَصَاصَةٌ وَمَنْ يُوقَ شُحَّ نَفْسِهِ فَأُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ}**

(**Kuwii madiino deganaa ee xaqa rumeeyay waxay jecel yihiin dadka u soo hijroon wax necbaansho ahna laabta uma geliyaan dadkaas waxay siin, waxayna naftooda ka hormariyaan (ay uga doori) dadkaas inkastaba iyagu gaajo hahaysee, ruuxii laga dhawro bakhaylnimada naftiisa waa mid liibaanay**)

Sidaas oo kale soonka wuxuu ku toosinayaa akhlaaqda muslinka daa'imidda cabsida Alle, wuxuuna barayaa sabarka iyo adkeysiga iyo nafta in meel sare la geeyo oo lagana fogeeyo wuxii Alle ka careysiinaya, wuxuu leeyahay nabigeena:

**(... وَالصِّيَامُ جُنَّةٌ ، وَإِذَا كَانَ يَوْمُ صَوْمِ أَحَدِكُمْ ، فَلاَ يَرْفُثْ ، وَلاَ يَصْخَبْ ، فَإِنْ سَابَّهُ أَحَدٌ ، أَوْ قَاتَلَهُ ، فَلْيَقُلْ إِنِّي امْرُؤٌ صَائِمٌ)**

**(...soonka waa gaashaan, haddii midkiina uu sooman yahay yuuna afxumo ku dhaqaaqin yuuna qaylinin**

**haddii qof caayo ama la dagaallamo ha yiraahdo: waxaan ahay qof sooman**)

Wuxuu leeyahay rasuulka:

**(مَنْ لَمْ يَدَعْ قَوْلَ الزُّورِ وَالعَمَلَ بِهِ ، فَلَيْسَ لِلَّهِ حَاجَةٌ فِي أَنْ يَدَعَ طَعَامَهُ وَشَرَابَهُ) .**

(**Qofkaan iska dhaafin Hadalka beenta iyo ku dhaqankiisa Ilaahay dan kama laha inuu ka tago cuntadiisa iyo cabbitaankiisa**).

Sidoo kale xajka waa toosnaan dhaqan iyo akhlaaqba xajka kahor iyo dhexdiisa marka la dhameeyo camaladiisa wuxuu yiri Alle:

**{الْحَجُّ أَشْهُرٌ مَّعْلُومَاتٌ فَمَن فَرَضَ فِيهِنَّ الْحَجَّ فَلَا رَفَثَ وَلَا فُسُوقَ وَلَا جِدَالَ فِي الْحَجِّ وَمَا تَفْعَلُوا مِنْ خَيْرٍ يَعْلَمْهُ اللَّهُ وَتَزَوَّدُوا فَإِنَّ خَيْرَ الزَّادِ التَّقْوَى وَاتَّقُونِ يَا أُولِي الْأَلْبَابِ}**

(**Xajka waa bilo la yaqaan, ee ruuxii gudagala bilahaas xajka, afxumo, fisqi iyo muran ma jiro xajka dhexdiisa, waxaad fashaan oo khayr ah wuu ogaan Alle, ee sahay qaata, sahay tan u khayrbadanna waa dhawrsashada, ee iga dhawrsada kuwa caqliga lahow**).

Waxaa laga wariyay Abuu Hureyra -Ilaahay raalli haka noqdee - inuu yiri nabiga:

**(مَنْ حَجَّ لِلَّهِ فَلَمْ يَرْفُثْ ، وَلَمْ يَفْسُقْ ، رَجَعَ كَيَوْمِ وَلَدَتْهُ أُمُّهُ)**

(**Qofka xajiyo oo aan afxumo ku kicin fisqina sameynin wuxuu ku noqonayaa sida maalinta hooyadii ku dhashay oo kale**).

Sidaas oo kale tiirarka islaamka waxay leeyihiin faa'idooyin bulshada khayr u keenaya iyo amaan iyo nabad.

Qofka fiirinaya diinteena xaniifka ah wuxuu ogaanayaa inay tahay diinta akhlaaqda suuban, dhanbaalkeedana wuxuu u yimid dhamystiridda akhlaaqdan, wuxuu leeyahay nabigeena:

(إِنَّمَا بُعِثْتُ لأُتَمِّمَ مَكَارِمَ الأَخْلاَقِ)

(**Waxaa laysoo diray inaan dhammeystiro akhlaaqda suuban**).

Marka la helo runta iyo oofinta iyo amaanada iyo samafalka iyo qaraabo xiriirinta iyo deeqsinimada iyo gurmadka iyo raganimada iyo isdhowridda iyo dadka in dhibka laga joojiyo iyo kan dhibbanna in loo gargaaro iyo kan gargaar dalbanaya in loo gurmado iyo kurabadda laga qaado dadka kurbaysan iyo xayawaanka in loo dhimriyo, markaas islaamka saxa ah ayaa la helayaa.

Waxaan shaki ku jirin in fahanka dhabta islaamka iyo garashada sirta risaaladiisa dabacsan iyo in la ogaado ujeeddooyinkiisa iyo ahdaaftiisa sare, iyo in lagu dabaqo waxaasoo dhan waxyaala soo cusboonaada casrigan iyo

waxa uu u baahan yahay waxaa lagu tiriyaa baahi soo noqnoqonaysa sidii looga hortagi lahaa caqabadaha casriga, iyo sii loo joojin lahaa kooxaha argagixisada iyo kuwa xagjirka ah, iyo in la go'doomiyo fikirka qaldan iyo in la jabiyo ad'adeyga iyo xirnaanta iyo fahanxumida iyo maskaxyarida iyo in looga baxo ciriirigan caalam ka waasacsan kana fudud kana bisil kana wacyi badan kana dheer aragti ahaan, kana xaqiijin badan ujeeddooyinka dalka iyo dadkaba iyo faafinta qiyamka insaaniyada sare oo xaqiijinaya amaan iyo nabad iyo xasillooni iyo liibaanta insaaniyada oo dhan.

Waxaa ka mid ah waxyaalaha ugu waajibnimada badan uguna muhimsan oo ay ku habboon tahay qof kaste musulin ah inuu sameeyo inuu u muujiyo dadka oo dhan dhanacyada weynida diinta islaamka si uu caalamka u ogaado inuu yahay islaamka diinta nabadda, uguna yeero, arrinkeedana kor u qaado, assalaam waa magac ka mid ah mgacyada Alle wuxuu leeyahaya Alle:

**{هُوَ اللَّهُ الَّذِي لَا إِلَـهَ إِلَّا هُوَ الْمَلِكُ الْقُدُّوسُ السَّلَامُ}**

(**Ilaahay isaga mooyee Alle kale ma jiro, waa boqor daahir ah, oo nabadgeliye ah**), salaanta islaamkana waa Assalaam wuxuu leeyahaya Alle:

**{وَلَا تَقُولُوا لِمَنْ أَلْقَى إِلَيْكُمُ السَّلَامَ لَسْتَ مُؤْمِنًا}**

(**Hana dhihina ruux salaan idiin soo gudbiyay ma tihid mu'min**).

salaanta ehlu jannahana jannada dhexdeeda waa assalaam wuxuu leeyahay Alle:

**{وَالْمَلَائِكَةُ يَدْخُلُونَ عَلَيْهِم مِّن كُلِّ بَابٍ سَلَامٌ عَلَيْكُم بِمَا صَبَرْتُمْ فَنِعْمَ عُقْبَى الدَّارِ}**

(Malaa'igtuna waxay uga soo gali irid kasta * iyagoo ku dhihi ىabadgalyo korkiinna ha ahaato samirkiinna dartiis waxaa wanaag badan cidhibta daarta (Janno)), Nabiga sharafta badan ducadiisa waxaa ka mid ahayd salaad kaste dabadeed:

**(اللَّهُمَّ أَنْتَ السَّلَامُ ، وَمِنْكَ السَّلَامُ ، تَبَارَكْتَ يا ذَا الْجَلَالِ وَالإِكْرَامِ)**

(**Ilaahayow adaa ah nabadgeliye nabaddana xaggaga ayay ka haatay, waad barako badan tahay midka weyniada iyo karaameynta lahow**).

Diinta islaamka waa diin u ilaaliso aadanaha sharaftiisa, waxay reebaysaa xanta iyo iskudirka iyo in lays xasdo iyo in lays naco iyo yasidda iyo dhibka si kaste ha ahaadee hadal ama fal xataa tilmaan ama baaq, wuxuu leeyahay Alle:

**{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا يَسْخَرْ قَوْمٌ مِّن قَوْمٍ عَسَى أَن يَكُونُوا خَيْرًا مِّنْهُمْ وَلَا نِسَاءٌ مِّن نِّسَاءٍ عَسَى أَن يَكُنَّ خَيْرًا مِّنْهُنَّ وَلَا تَلْمِزُوا أَنفُسَكُمْ وَلَا تَنَابَزُوا بِالْأَلْقَابِ بِئْسَ الِاسْمُ الْفُسُوقُ بَعْدَ الْإِيمَانِ وَمَن لَّمْ يَتُبْ فَأُولَئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ}**

(**Kuwa xaqa rumeeyow yuuna yasin ragna rag (kale) waxay u dhawdahay inuu ka khayr badanyahaye, haweenna yayna haween yasin waxay u dhawyihiin inay ka khayr badanyihiine, hana ceebeynina naftiinna,**

**hana isugu dhawaaqina naanays xun, waxaa xun magaca faasiqinimada iimaan kadib, ciddaan tawbad keeninna waa daalimiin**).

wuxuu leeyahay nabigeena:

**(مَنْ أَشَارَ إِلَى أَخِيهِ بِحَدِيدَةٍ ، فَإِنَّ المَلاَئِكَةَ تَلْعَنُهُ حَتَّى يَدعَهُ ، وَإِنْ كَانَ أَخَاهُ لأَبِيهِ وَأُمِّهِ)**

(**Qofkii walaalkiisa bir ku aaddiyo malaa'igta ayaa lacnadeysa ilaa uu ka tago xataa hadduu yahay walaalkiisa isku hooyo iyo isku aabbe ay yihiin**), wuxuu naga reebay nabigeena in la garaaco wejiga iyo in summad loo yeelo, markuu arkay rasuulka xayawaan oo wejiga laga summadeeyay wuxuu yiri:

**(لَعَنَ الله الّذِي وَسَمَهُ)**

(**Ilaahay ha lacnado qofkii summadda u yeelay**)

Marka la weyddiiyay naag soon badan oo salaatuleyl badan laakin deriskeeda ayay dhibtaa wuxuu yiri:

(**Iyada naarta ayay galaysaa**), wuxuu leeyahay:

**(مَنْ كَانَ يُؤْمِنُ باللَّهِ وَالْيَوْمِ الآخِرِ ، فَلا يُؤْذِ جَارَهُ ، وَمَنْ كَان يُـؤْمِنُ بِاللَّهِ والْيَوْمِ الآخرِ ، فَلْيُكْرِمْ ضَيْفَهُ ، وَمَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيـومِ الآخِـرِ ، فَلْيَقُلْ خَيْرًا ، أَوْ لِيَسْكُتْ)**

(**Qofka rummaysan Ilaahay iyo maalinta aakhiro yuuna dhibin deriskiisa , qofka rummaysan Ilaahay iyo**

**maalinta aakkhiro martidiisa ha karaameeyo, qofka rummaysan Ilaahay iyo maalinta aakhiro wanaag ha sheego ama ha iska ammuso**).

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Walaalaha islaamka ahow:**

Nabiga wuxuu ku sugay fariimaha islaamka ee dabacsan iyo akhlaaqdiisa sharafta badan iyo qiimihiisa sharafta leh quluubta asxaabtiisa ilaa ay ka noqdaan manhaj nololeed oo ay ku noolaanayaan dadkana kula noolaanayaan waa kanaa Jacfar bin Abii daalib -Ilaahay raalli haka noqdee - oo istaagaya Najaashi hortiisa boqorka Xabashada asoo caddeynaya wax ka mid ah akhlaaqdan una caddeynaya qaab heer sare ah kuna caddeynaya ereyo kalsooni leh:

(**Boqorow waxaan ahayn dad jahli ku jiro oo sanamyada caabudo, bakhtigana cuno xaaraamtana xalaalaysta, xumaan ayaan sameyn jirnay qaraabada ayaan goyn jirnay deriska ayaan xumeyn jirnay, midkeena xoogga leh kan tabarta yar ayuu cuni jiray, sidaas ayaan ku sugneyn, Ilaa Alle noogu soo saaro rasuul naga mid ah aan nasabkiisa garanayno, iyo runtiisa iyo amaanadiisa iyo dhowrsanaantiisa wuxuu noogu yeeray Ilaahay inaan mideyno oo aan caabudno, inaan ka tagno wixii aan caabudi jirnay annaga iyo aabbayaasheena oo dhagxaanta Alle sokoadiisa iyo sanamyada, wuxuu na faray hadalka runta iyo gudashada amaanada iyo xiriirinta qaraabada, iyo derisga inaan wanaajino, xaaraamtana aan ka tagno iyo dhiigga, wuxuu naga reebay xumaanta iyo hadalka beenta iyo cunidda hantida agoonta iyo haweeneyda dhowrsan in la qadfiyo (lagu been abuurto), wuxuu na**

**amray inaan caabudno Alle kaligiisa oo aanan wax la wadaajinin, wuxuu na amray salaadda iyo sakada iyo soonka…**)

Muslinka dhabta ah been ma sheego qishna ma sameeyo mana ku kaco khiyaano, muslinka dhabta ah waa kan ay dadka ka nabadgaleen carrabkiisa iyo gacantiisa, mu'minka dhabta waa kan ay dadka kaga nabadgaleen dhiiggooda iyo sharaftooda iyo hantidooda iyo naftooda, muslinka dhabta waa oo kan ay ka muuqato akhlaaqda islaamka, dadka waxan khayr iyo samafal ahayn kama helaan, haddaan doonno inaan u dejino qeexid sax ah muslinka dhabta ah uma heleyno qeexid ka fiican midda uu nabigeena ku qeexay inuu yahay kan ay dadka ka nabadgaleen carrabkiisa iyo gacantiisa, wuxuu leeyahay rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**(أَلَا أُخْبِرُكُمْ بِالْمُؤْمِنِ؟ مَنْ أَمِنَهُ النَّاسُ عَلَى أَمْوَالِهِمْ وَأَنْفُسِهِمْ ، وَالْمُسْلِمُ مَنْ سَلِمَ النَّاسُ مِنْ لِسَانِهِ وَيَدِهِ ، وَالْمُجَاهِدُ مَنْ جَاهَدَ نَفْسَهُ فِي طَاعَةِ اللهِ ، وَالْمُهَاجِرُ مَنْ هَجَرَ الْخَطَايَا وَالذَّنُوبَ)**

**(Ma idin sheegaa mu'minka?, waa kan u nabadgaliyay hantidooda iyo naftooda, muslinkana waa kan ay dadka ka nabadgaleen carrabkiisa iyo gacantiisa, mujaahidkana waa ka naftiisa kula jahaaday daacada**

**Ilaahay, muhaajirkana waa kan ka hijrooday gefafka iyo dambiyada**).

Islaamka waa risaalada insaaniyadda iyo xigmadda iyo dabacsanaanta iyo naxariista iyo deeqidda iyo jilicsanaanta, waa risaalo wax isku keenta ee aan wax kala geynin, oo wax mideysa ee aan wax kala yaacinin, islaamka waa cadaalad dhammaantii, waa naxariis dhamaantii, waa dabacsanaan dhamaantii, waa fudeyd dammaantii, waa insaaniyad dhamaantii, waxkastoo keenaya macaanidan qiimaha badan wuxuu ka mid yahay islaamka, wixii ka hor imaanayana ama khilaafaya wuxuu khilaafayaa islaamka iyo ujeeddooyinkiisa iyo maqaasiddiisa.

**Ilaahayow nagu hanuuni akhlaaqda midda ugu fiican kuma hanuuniyo qofaan adiga ahayn, nagana leexi teeda xun kama leexiyo qofaan adiga ahayn, ka ilaali masar iyo shacbkeeda iyo ciidankeeda iyo nabadsugiddeeda wax kastoo xun adigaa ahee kuwa naxariista kan ugu naxariista badan.**